

Guddiga Maamulka Maaliyadda (GMM): Hadalqoraalka kulanka oo kooban

Kulanka 55aad ee 22ka Juunyo 2022 – Fogaan-arag

Arrimaha Maaliyadda: Wasiirka Maaliyaada Dowladda Federaalka ahna Shir Gudoomiyaha ayaa ka warbixiyay halka ay marayso ansixinta Miisaaniyadda 2022-ka ee Baarlamaanka Federaalka. Kulanka ayaa loogu hambalyeeyay Waaxda Miisaaniyada iyo dhammaan xubnaha GMM, dadaalka ay ku bixiyeen sidii ay u soo dari lahaayeen deeqaha la siiyo hay'adaha DFS miisaaniyada iyo khasnada dhexe ee dowladda si waafaqsan sharciga Maamulka Maaliyadda Guud ee 2019, oo ay ku jirto lacag dhan USD 16 milyan oo mashruuc ah oo ay bixisay Qaramada Midoobay. Kulanka ayaa lagu sheegay in miisaaniyada 2022 oo aad u badan ay ka kooban tahay mashaariic dibedda laga maalgeliyay sidaas darteed inkastoo miisaaniyadu korortay hadana way xadidan tahay mushaar kordhinta ama balaarinta hay'adaha.

Kulanku wuxuu xusay baahida loo qabo siyaasad cad oo dawladeed oo hageysa dhisidda hay'ado cusub taa oo qayb ka ah dib-u-habaynta maaliyadeed. GMM waxuu talo ka siin doontaa maamulka cusub arrintan.

Arrimaha Batroolka iyo Gaaska: Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta ayaa ka warbixiyey halka ay marayaan diyaarinta Nidaamka Qandaraasyada Shidaalka iyo Gaaska oo la waafajinayo Shuruucda libka iyo Shidaalka, iyo sidoo kale halka ay marayaan heshiiska 7-da xirmo ee lala saxiixday shirkadda Coastline bishii Febraayo 2022.

Heshiiyada iyo Qandaraasyada: Kulanka ayaa soo dhoweeyay qoraal talobixin ah oo ku saabsan waxqabadyada mudnaanta u leh maamulka cusub ee ku saabsan iibka guud iyo heshiisyada. Waxaa looga hadlay qandaraasyada raashinka ee laamaha amniga ee soo socda iyo tartanka furan ee adeegga hubinta tayada badeecada la soo dhoofiyo ee Heyadda Tayo Dhoorka Soomaaliya. Agaasimaha Guud ee Socdaalka iyo Jinsiyadaha ayaa uga warbixiyey kulanka habraaca qandaraaska baasaboorka, wuxuuna soo dhoweeyay taageerada GMM ee ku aaddan helista khibradda farsamo ee lagama maarmaanka u ah horumarinta iyo hergelinta qandaraaska baasaboorka. Shirku wuxuu soo dhoweeyay talada GMM ee ku saabsan soo saarista Wareegtada libka Degdegga ah iyo ku darida Hagida libka Degdegga ah xeerarka wax iibka guud.

Bangiga Dhexe iyo Arimaha Dhaqaalaha: Gudoomiyaha Bangiga dhexe ee Soomaaliya ayaa kulanka uga warbixiyay dadaalka joogtada ah ee Bangiga uu ku sameynayo dib u habeynta hay'adaha maaliyadda iyo taageerada dhaqaalaha dalka oo ay ka mid tahay horumarinta habka lacag bixinta Soomaaliya oo taageeraya wada shaqeynta bangiyada maxaliga ah. Kulanka ayaa soo dhoweeyay la shaqada Bangiga ee SWIFT si loo mideeyo nidaamyada bangiyada Soomaaliyeed si loo sameeyo nidaamka IBAN kaasoo sahlaya u diridda lacagaha dibadda.

Muddo Kordhinta GMM: Shir Guddoomiyaha ayaa xaqiijiyay in Madaxweynaha JFS Xasan Sheekh Maxamuud uu oggolaaday in muddo afar iyo labaatan bilood ah loo kordhiyo xilliga uu shaqeynayo GMM.